*Somaliska*

# Warbixin kooban oo ku saabsan xulashada dugsiga sare

La diyaariyay: 2020-09-03



# In laga fekero xulashada dugsiga sare kahor

Sida loogu dhaqaaqo xulashada dugsiga sare oo heer sare awgeed, waxaa adiga oo ah qof arday u baahan tahay inaad horumariso **kartida xulashada ee adiga ku gaarka ah.** Waa arrin ku saabsan inaad fiirogaar isi-siiso oona sahmiso fursadaha kala xulashada la heli karo, kuwaasoo kaddib ku suurtagelin doonto xulashada waxbarashada kugu habboon.

## Sahmi fursadaha kala xulashada ee la heli karo

Kaddib markii aad ka qalin-jebiso dugsiyada biloowga/hoose/dhexe waa inaad sahmisa fursadaha kala xulashada ee la heli karo. Ha ahaadeen waxbarashooyinka la heli karo iyo xirfadda aad yeelan karto kaddib markii aad ka qalin-jebiso waxbarashooyinka – laakin xitaa xaaladda suuqa shaqada ay ku sugan tahay.

Su'aallaha hoos ku xusan ayaa kaashan kartaa sidii aad ku hesho muqaal heer sare ah oo xiriir la leh fursadaha kala xulashada:

- Noocyada barnaamijyada dugsiga sare ee la heli karo waa kuwee?
- Maxay yihiin waxa barnaamijyada kala duwan laga sameeynayo / maxayn ka kooban yihiin?
- Xaaladda suuqa shaqada waa sidee hadba barnaamijyada dugsiyada sare ee kala duwan?
- Waa sidee fursadaha sii wadashada waxbarashada kaddib markii aad ka qalin-jebiso barnaamijyada kala duwan?

## Aqoon isku yeelo/fiirogaar isisi

Xulashada dugsiga sare darteed waxaad u baahan tahay inaad aqoon isku yeelato/fiirogaar isi siiso. Waa arrin xiriir la leh inaad ka fekerto sida tusaale:

- Maxay yihiin waxa caafimaad-wanaaga ii dareen-siiyo?
- Maxaan ku fiican nahay?
- Maxaan xiiseeyaa?
- Maxay yihiin astaamaha shakhsiyadeedkayga?

Kaddib markii aad si fiican ugu fekerto waxbarashada kugu habboon, ayaa arday ahaan gaari kartaa go'aankaaga, macnaha ku dhaqaaqi kartaa xulashada dugsiga sare.

Xilliga Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe waxaa arday ahaan lagu siin doonaa taageero iyo tababar arrintaan xiriir la leh, ha ahaadeen qayb casharada kamid ah laakin xitaa wadajir La taliyeha xirfadaha iyo waxbarashada [studie- iyo yrkesvägledare] ee iskuulka.

## Shahaadooyinka iyo qiimaha mudnaanta [meritvärde]

Dhammaan ardayda dugsiyada biloowga/hoose/dhexe waxaa la siiyaa shahaadooyinka maaddooyinka oo idil, laga bilaabo F ilaa A. Xarafka F wuxuu u dhigma kuma guulaysan halka shahaadooyinka E, D, C, B, A waxay u dhigmaan shahaadooyin lagu guulaystay. Markii dugsiga sare la xulanayo waxaa dib loo xisaabiyaa shahaadooyinka, loo roga waxa loo yaqaanno qiimaha mudnaanta [meritvärde], taasoo ka caawini doonto inaad hesho waxbarashada aad xulatay.

## Sidatan ayaa qiimaha mudnaanta [meritvärde] loo xisaabiya

Qiimaha mudnaanta [meritvärde] waa isku-darka dhammaan shahaadooyinka aad haysato, hadaba dhammaan shahaadooyinka maaddo kasta laga haysto. Waxaad haysata isku-darkii 16 maaddooyin, ama 17 haddii aad barato luqad casri ah. Xarafka shahaado kasta waxaa laga hela tiro dhibcood.

Muqaalka qiimaha shahaadooyinka waa sidatan:

- F – kuma guulaysan: 0 dhibic
- E – wuu ku guulaystay: 10 dhibic
- D – wuu ku guulaystay: 12,5 dhibic
- C – wuu ku guulaystay: 15 dhibic
- B – wuu ku guulaystay: 17,5 dhibic
- A – wuu ku guulaystay: 20 dhibic

Markii aad codsanayso dugsiga sare waxaa la isticmaala shahaadooyinka qalin-jebinta laga siiyay markii aad ka qalin-jebisay fasalka 9-aad [shahaadooyinka sannad-dugsiyedka dayrta].

## Karti-waxbarashadeed iyo xulashada

Sida lagu helo **barnaamijka dugsiga sare** awgeed waa inaad karti-waxbarashadeedka leedahay. Karti-waxbarashadeedka waxaad yeelan kartaa haddii ugu yaraan leedahay shahaadada E ee maaddooyinka ugu muhimsan, sida:

- Af-iswiidish/af-iswiidish luqad labaad ahaan
- Xisaab
- Af-ingriisi

Sidii aad karti-waxbarashadeedka **barnaamij-xirfadeed** ku yeelan lahayd awgeed, waxaad u baahan tahay inaad haysato ugu yaraan shahaadada E maaddooyinka ugu muhimsan shahaadooyinka iyo 5 maaddooyinka kale oo aad ku guulaysatay. Isku-darkii waa ugu yaraan 8 maaddooyin aad shahaadooyinkooda ku guulaysatay.

Kaddib markii aad karti-waxbarashadeedka **barnaamij isku diyaarinta wax ku barashada kuliyad [högskoleförberedande]** hesho waxaad u baahan tahay inaad haysato ugu yaraan shahaadada E maaddooyinka ugu muhimsan shahaadooyinka iyo 9 maaddooyinka kale oo aad ku guulaysatay. Isku-darkii waa ugu yaraan 12 maadooyin aad shahaadooyinkooda ku guulaysatay.

Barnaamijyadaha qaarkood waxaa laga raba inaad ku guulaystay maaddooyinka gaar ah.

- NA [Abuurka] iyo TE [Teknoloojiyada] waxaad kaloo u baahan tahay inaad ku guulaystay maaddooyinka bayoolaji, fiisiks iyo kimistariga
- EK [Dhaqaalaha], SA [Aqoonta bulshada] iyo HU [Dadnimo] waxaad kaloo u baahan tahay inaad ku guulaystay maaddooyinka taariikhda, diinta, aqoonta bulshada iyo juqraafiga.

Markii aad codsanayso barnaamijka dugsiga sare, waxaa barnaamij kasta u leeyahay dhawr boos. Sidaas awgeed, waxaa la kala xusha ardayda leh karti-waxbarashadeedka oo barnaamij mucayin dalbaday. Waxaa la oran karaa in qiimaha mudnaanta [meritvärde] ay ”boos safka” barnaamijka aad codsatay ka siinayso.

Tan kale, waxaa muhim ah inaad ogaato in karti-waxbarashadeedka aysan ahayn damaanad, oo toos ku suurtagelinayso inaad boos ka hesho barnaamijka dugsiga sare ee aad xulatay.

## Fursadaha kala xulashada waxbarashada

Dugsiga sare wuxuu ka kooban yahay 18 barnaamij-qarmeed, 12 barnaamij-xirfadeed iyo 6 barnaamij isku diyaarinta wax ku barashada kuliyadaha [högskoleförberedande]. Ardayda aan lahayn karti-waxbarashadeedka waxay heli karaan barnaamijka gogoldhigga [IM]. Waxbarashooyinka-qarmeed ka sokow waxaa la helaa waxbarashooyin heer qarmeed ah oo leh qalinjebin u gaar ah iyo IB [International Baccalaureate]. Warbixin dheeraad oo ku saabsan Fursadaha kala xulashada waxbarashada ka aqriso barta internetka ee wasaaradda waxbarashada [Skolverket] www.waxbarashada sguiden.skolverket.se.

## Dugsiyada sare ee gobolka ku yaalaan

Gobolka waxaa ku yaalaan tiro badan oo ah dugsyada sare, kuwaasoo aad mid ka xulan karto. Barnaamijyada dugsiyada sare badidooda waxaa laga helaa dhawr iskuullada kamid ah.

Dugsiyada sare ee gobolka laga helo:

- Isbahaysiga dugsiyada sare ee Gobolka [Jämtlands gymnasieförbund [JGY]. Wuxuu ka kooban yahay dugsiyada sare ee Dowladda hoose maamusho, dugsiga sare ee gaarka [gymnasiesärskolan ] iyo waxbarashada dadka waawayn, dhammaan Gobolka Jämtland. Iskuullada Isbahaysiga waa:
  - Bispgården
  - Bräcke
  - Fyrvalla [Östersund]
  - Torsta [Ås]
  - Wargentin [Östersund]
  - Wången [Nälden]
  - Åre
- Storsjögymnasiet
- Östersunds gymnsium
- Dille gård
- Hjalmar Strömerskolan [degmada Strömsund]
- Fjällgymnasiet [degmada Berg]
- Härjedalens gymnasium

Ardayga degan degmooyinka Jämtland/Härjedalen wuxuu barnaamij ka dhigan karaa mid iskuulada kamid ah. Warbixin dheeraad oo ku saabsan iskuullada iyo barnaamijada waxaa laga aqrisan karaa barta internetka ee iskuulka la xushay.

## Heshiiska iskaashiga wuxuu ku suurtagelinayaa inaad codsato waxbarashooyinka qaarkood ee laga helo gobollo kale

Iskuullada kor ku xusan ka sokow, waxaad xita heli kartaa fursad aad ku codsato waxbarashooyinka qaarkood ee laga helo gobollo kale. Isbahaysiga dugsiyada sare ee Gobolka [Jämtlands gymnasieförbund [JGY] wuxuu heshiis iskaashi la galay dhawr maamullada degmooyin kale, kaasoo ardayda u suurtagelinayso in hab madaxbannaan ay waxbarasho ka codsadaan degmooyinka kale. Isla fursadaas ayaa la heli karaa haddii xitaa waxbarashada ay xiriir la leedahay isboortiga. Warbixin dheeraad oo ku saabsan waxbarashada laga helo Gobolka Jämtland iyo heshiiska iskaashiga ee waxbarashooyinka xiriirka la leh ka aqriso www.gyantagningjamtland.se.

## Halka aad doonayso dalka Iswiidan dugsi sare ka codso

Arday ahaan iskuullada iyo barnaamij waxaad ka dalban karta dalka oo idil. Xaaladaha qaarkood waxaa dhici karto in aan mudnaanta koowaad lagu siinin, taasoo macnheeda ay tahay in boos iskuulka laga siin doono haddii boos firaqo laga helo. Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad oo arrintaan ku saabsan la xiriir La taliyeha xirfadaha iyo waxbarashada [studie- och yrkesvägledare].

# Hab-shaqaynta codsashada waa sidatan

## Codso xilliga gu'ga

Bilowga xilliga gu'ga fasalka 9-aad ayuu ardayga codsanaya dugsiga sare. Dhammaan ardayda waxaa la siinayaa maclumaadka iyo passwordka lagu guda-galo madasha [Dexter], waa hab-dhiska u ardayga isticmaali karo markii u dugsiga sare codsanaayo. Markaas kaddib ayay xulashada iyo kala darajo-siinta barnaamij iyo iskuulada aad doonayso bilaabanaysaa. Markii codsiga la soo diro, waxaa loo sii gudbinyaa aqbalida dugsiga sare.

## Wargelinta hordhaca bisha abriil

Biloowga bisha abriil waxaa laysku ururinayaa wargelin hordhac ah, dhammaan ardaydii laga helay codsiga waxay isha ku dhufan karan qiimaha mudnaansiintooda [meritvärde] halka ay kaga sugan yihiin boos u tartanka. Waxaa kaloo la heli kara fursad wax looga beddelo xulashadii hore ee codsiga ku qorna. Xilligaas waxaa loo yaqaanno xilliga dib u xulashada [omvalsperiod] waxayna caadi ahaan ku eg tahay biloowga bisha maajo.

## Wargelinta aqbalida biloowga bisha luulyo

Xilliga dib u xulashada kaddib waxaa laga arrinsanaya dhammaan xulashadaha. Markii iskuullada laga helo warbixin xiriir la leh shahaadooyinka qalin-jebinta ee ardayda, waxaa madasha [Dexter] lagu soo dhigaya wargelinta aqbalida. Taasoo la helo bilowga bisha luulyo.

## Booska waad oggolaan kartaa ama waa diidi karta

Kaddib markii wargelinta aqbalida lagu wargeliyo, waxaad guda geli kartaa madasha [Dexter] kaddib booska lagu soo bandhigay waad oggolaan kartaa ama waa diidi kartaa.

## Dhaqaalaha

Markii ardaygu u dhiganayo dugsiga sare wuxuu heli kartaa taageero-dhaqaaleed kala duwan. Warbixin dheeraad oo ku saabsan dhaqaalaha ka aqriso barta internetka ee Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] www.csn.se

Dhammaan dadka buuxsaday 16 sano, iyo wakhti buuxa wax barto, waxaa la siiya taageero-dhaqaaleed wabarashada [studiebidrag]. Waa sida taageero-dhaqaaleed carruurta [barnbidrag], laakin 10 bilood/sannadkii ayaa la bixiyaa. Taageero-dhaqaaleed wabarashada [studiebidrag] uma baahnid inaad codsato haddii dalka Iswiidan aad wax ku barato oona aad haysato dhalashada dalka Iswiidan.

Taageero-dhaqaaleedyada kale oo la codsan karo waxaa kamid ah; taageero-dhaqaaleed oo dheeraad ah [extra tillägg], taakulaynta hoyga [inackorderingstillägg] iyo gunnada shaqo barashada [lärlingsersättning].

## La taliyeha xirfadaha iyo waxbarashada [Studie- iyo yrkesvägledare] wuxuu ka caawin karaa wixii su'aallo ah ama aad is-waydiinayso

Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ee Dowladda hoose Östersund maamusho, waxaa ka hawlgala La taliyeha xirfadaha iyo waxbarashada [Studie- iyo yrkesvägledare]. Kaasoo ka caawini karaa wixii su'aallo ah ama aad is-waydiinayso oo xiriir la leh si wadashada waxbarashada. Faahfaahinta xiriirka La taliyeha xirfadaha iyo waxbarashada [Studie- iyo yrkesvägledare] waxaad ka heleysa baraha internetka ee dugsi kasta www.ostersund.se.